

Doonitaankaada ah inaad kala qeyb gasho inuu cunugaadu qaato qalabka cranial orthosis waa mida ugu muhiimsan ee daaweeynta wanaagsan ee deformational plagiocephaly. Qeybta caruurta ee Gillett e waxay u sameeyeen koofi yad caaga oo lagu magaaco CranioCap® cunugaada. Halkaana waxaa ku qoran tilmaamaha habka wanaagsan ee loo isticmaalo koofi yadaas.

## **Nadiifinta**

Dhaq koofi yada CranioCap® hal mar ama labo mar maalintii adigo isticmaalaya wax yar oo saabuunta aan ilmadakeenayn ah sida mida Johnson & Johnson ama Baby Magic. Maalin kasta gudaha CranioCap® ku nadiifi aalkolada loo yaqaan isopropyl si aad uga ilaaliso in ay koofi yada CranioCap® gudaheeda saabuuntu ku dhagto. Hubso incunugaada madaxiisa iyo koofi yada CranioCap® ay labaduba qalalan yihiin ka hor inta aadan gelin madaxa cunuga. Midaasi waxay ka ilaalinaysaa cunuga maqaarkiisa cununka iyo inay koofi yadu jabto.

## **Calaamadaha Casaanka ah**

Mar kasta ka fi iri cunugaada maqaarkiisa calaamado gaduud ah ka dib marka uu koofi yada cabaar qabo. 30 daqiiqadood ka dib, wixii calaamado gaduud ah ee ka muuqaday waa inay baabaaan, haddii aanay baabin markaa halkaas waxaa saaran cadaadis.

Calaamadaha casaanku waxay badanaaba muuqdaan markii ay cunuga madaxiisu korayo ama is bedelo. In loo geeyo oo uu eego dhaqtarka orthotist-kana waa mid muhiim ah si uu u habeeyo una hubiyo in koofi yadu si fi ican oo haboon madaxa cunuga ugu xiran tahay. Markii koofi yada CranioCap® loo sameeyo cunugaada, dhaqtarka orthotist-ah ayaa eegi doona labadii ama sitimaankiiba mar. Eegitaankaas dhaqtarkuna qarashkiisa waxa uu ku jira qiimaha koofi yada CranioCap.

## **Qadashada Koofi yada CranioCap®**

Koofi yada CranioCap® waxaa loo sameeyay inay madaxa cunugaada si fi ican u qabato. Ku aadi xariij inta dhexe sanku cunuga oo u xir xariga Velcro® ee koofi yada CranioCap® si ay u xiranto, laakiin aad ha u dhuujin.

Markii uu madaxa cunugaadu korana waxaa loo baahan yahay inaad si tartiib ah u sii debciso xariga Velcro®.

### **Jadwalka xirashada**

Ka dib markii uu cunugaadu dhamaysto mudada tij aabada ah (hoos ka fi iri), uu cunugaadu xirto koofi yada CranioCap® qiyaastii 22 saacadood maalin walba. Xasuuso inaad ku darto 30 daqiiqadood oo nasasho ah sadaxdii ama afartii saacadood ee kasta.

### **Jadwalka xirashada mudada tijaabada ah**

#### **Maalinta koowaad**

Tani waa maalinta koowaad ee uu cunugaadu xiranayo koofi yada CranioCap® ku biloow inuu cunugu xirto koofi yada hal saac ka dibna ka bixi 30 daqiiqadood. Ku sii wad jadwalkaas maa-linta oo dhan. Xasuuso inaad ka fi iriso meelaha casaanka ah maalinta oo dhan. Cunugaadu uma uu baahan doono inaad u xirto koofi yada CranioCap® marka uu seexanayo maalintii ama habeenkii maalinta ugu horeeysa.

#### **Maalinta labaad**

Ka sii siyaadi xiliyada uu cunugaadu xiranayo koofi yada 1 saac kana dhig labo saacadood, oo ay u dhaxeeyso 30 daqiiqadood oo nasasho ah. Sii wad jadwalkaas maalinta labaad, mar kastna ka fi iri calaamado casaan ah marka uu ka nasanayo koofi yada. Maantay isku day inuu cunugaadu xirto orthosis marka uu maalinta seexanayo, laakiin mahiim ma aha xiliyada habeenkii uu seexanayo.

#### **Maalinta sadexaad**

Cunugaadu waxa uu xiran kara labo saacadood koofi - yada CranioCap® markiiba, oo ay la socdaan 30 daqiiqadood oo nasasho ah maalinta oo dhan. Isku day inay u xirnaadaan orthosis-ka mudada uu cunugaadu seexanayo maalintii iyo habeenkiiba.

#### **Maalinta afaraad**

Waxaad bilaabi karta shadwalka gasashada caadiga ah. Cunugaadu waa inay u xirnaata ee koofi yada CranioCap® sadex ama afar saacadood markiiba, oo ay u dhaxeeyso 30 daqiiqadood oo nasasho ah. Mar labaad, xasuuso inaad eegto calaamadaha casaanka ah xilliyada uu ka nasanayo gasashada koofi yada. Cunugaadu waa inuu xirtaa markaan orthosis mudada seexashada ee maalintii iyo habeenkiiba. (OGAYSIIN: cunugaadu uma uu baahan doono inuu gasashada koofi yada ka nasto 30 daqiiqadood xilliga hurdada.)

## Qandhada

Haddii ay cunugaadu ku dhacdo qandho kulaylkeedu 101 0 Fahrenheit, jooji isticmaalka koofi yada CranioCap® ilaa iyo inta ay qandhadaasi ka joogsanayso. Midaasi waxay ka caawinaysaa inuu cunugaadu helo caawinaada uu u baahan yahay.

## Cuncunka (Rash)

Cunugaada waxaa laga yaaba inay ka soo yaacaan nabro cuncun ah inta uu isticmaalayo koofi yada CranioCap®. Waxaa laga yaaba inay midaasi keenayso kulaylka, fi yras, bakteeriya, fangas ama aleerjig. Nabarada qaarkood waxay u baahan yihiin daaweeyn qaas ah. Haddii uu cunugaadu qabo qandho ay nabaro la socdaan, la xariir dhaqatarkaada koowaad oo jooji isticmaalka koofi yada CranioCap®.

Si aad uga ilaaliso nabarada cuncunka ah:

- U geli cunugaada dhar qaboow.
- U isticmaal bustayaal qafi if ah sariirta.
- Meel qaboow ku hay cunugaada maalmaha kulaylku jiro. (haddii aad qorsheeynayso inaad dibada u baxdo xilliga kulaylaha, cunugaadu ma aha inuu xirto koofi - yada CranioCap® inta uu dibada joogo.)
- 

Alaabta laga sameeyo batroolku waxaa loo isticmaali kara in cunugaada korkiisa lagu difaaco. Alaabtaasi waxay ka caawin karta ka hortaga waxaayabaha dhaliya cuncunka ee ka imanaya inta u dhaxeeysa maqaarka cunuga iyo koofi yada CranioCap®. Haddii aad isticmaasho alaabtaas, xoogaa yar kaliya u mari lafta madaxa cunuga (Aquaphor ayaa ka mid ah alaabta laga sameeyo batroolka).

Farmashiyaha degaankaada ayaa ah meel fi ican oo aad ka heli karto daawooyinka aad iibsano karto ee cuncunka iyo dhibaatooyinka kale ee maqaarka ee horay u jiray, sida cambaarta. Inta aad cunuga ka daaweeynayso cuncunka, waxaa ku fi ican inaad ku noqoto jadwalka gasashada “waqtiga tij aabada”.

### **Cradle Cap**

Haddii uu cunugaadu madaxa ku leeyahay waxa loo yaqaan cradle cap (cambaar wax u eg oo jaale ah, qafi if na ah), si tartiib ah ugu nadiifi buraash madaxa cunuga mar kasta oo aad shaambo u mariso. Hubso inaad ka fi iriso wixii calaamado infegshan ah meelaha casaanka ah, nabar ama wax malax u eg. Haddii aad waxyaabahaas ku aragto, u sheeg dhaqtarka guud ee cunuga.

### **Digniin**

Haddii uu cunugaadu sido kale qabo qoor qalooc (torticollis) (Muruqa qoorta oo hal dhinac u qalooca), jiradaas waxaa sidoo kale daaweeya dhaqtarka cunuga.

Su'aalaha: haddii aad qabto wax su'aal ah ama welwel ah, fadlan soo wac:

- St. Paul (Main) Campus 651-291-2848
- Minnetonka Clinic 952-936-0977
- Burnsville Clinic 952-223-3400
- Duluth Clinic 218-728-6160

### **DIGNIIN:**

Sharciga Federal-ku waxa uu ku xadadayaa gadashada koofi yada CranioCap® ka dalbashada dhaqtarka oo kaliya